



# Wararkii ugu Dambeeyey ee Ku Saabsan Diiwaangalinta Dugsiyada Dadweynaha Portland (PPS) iyo Barnaamijka Dheelitirka Hawsha

Oktoobar 27, 2020

Qoysaska Qaaliga ee PPS,

Waxa aanu jecelnahay inaan idinla socodsiino waxyaabaha cusub ee ku saabsan horumarka laga sameeyey [Diiwaangalinta iyo Barnaamijka Dheelitirka](#) (EPB). Sidii aan idiniila wadaagnay, bilowgii hawsha waxaan diirada saarnay iskuulada ku yaala magaaalada Koonfurr-barigeeda taasi oo aan rajeyneynay dib in loo furo Dugsiga Dhexe Kellogg. Isbahaysiga Hoggaanka Koonfur-bari waxa ay qabteen lix shir oo ujeedaddu ahayd sidii loo abuuri lahaa faham guud oo yeeshaan Isbahaysiga sidii loo horumarin lahaa habka soo jeedimaha iyo tallo-bixinta kama dambeysta ah. Habku wuxuu bilaabmayaa in diirada hadda la saaro fasalada 6 ilaa 8aad, iyo in la ballaariyo fasalada PK-12 gu'ga soo socda.

Dhowrkii todobaad ee la soo dhaafay, Isbahaysigu waxa ay isticmaaleen xog ururin la falanqeeeyey iyo dhowr qaab oo lagu qiimaneyey aragtida ay ka qabaan bulshadu iyo iyada oo laga wada hadlay tiro aragtiyo kala gedisan oo suurtagal ah. Xubnaha ka shaqeeyey sidii loo horumarin lahaa soo jeedin la kala hufay in lala wadaago bulshada inteeda kale ee ballaaran. Todobaadka soo socda waxa ay heli doonaan natijada in ka badan 800 oo jawaabood iyaga oo ku heli doonaa dhinaca online-ka iyo sahano lagu qaaday dhinaca telefoonka. Natijada sahanka waxa ay ina wargelin doontaa horumarinta suurtagalka ah oo laga heli doono [Shabakada Diiwaangalinta iyo Barnaamijka Dheelitirka](#).

**Dugsiyada degmadu waxa ay martigalinaya booqashada dhinaca online-ka ah maalinta Khamiista, bisha Noofembar 19 keeda, sidii ay iduinla wadaagi lahaayeen macluumaad ku saabsan soo jeedinta (jeedimaha) isbahaysiga iyo aragtiyaha la soo ururiyey.** Dugsiyada degmadu sidoo kale waxa ay ka qeybqaadan doonaan daneeyaal muhiim oo ah kooxo kala duwan oo diirada saaraya ujeedooyin kale iyo luqado badan isla todobaadkaasi. Kulankaasi dhinaca online-ka ah iyo kooxahaasi kala gedisan waxa ku jiri doona macluumaadka salka u ah kuna saabsan habka ay u socdaan, muuqaalo idinka caawinaya oo lagu soo bandhigayo soo jeedinta(jeedimaha), iyo fursado lagu bixiyo aragtida laga qabo soo jeedimaha.

Kulanka dhinaca online-ka ah waxa ka mid ah bogga shabakada (website) kaasi oo aad booqan kartaan wixii macluumaad iyo xog ah ee aad u baahan tiiin inta habkani socdo oo dhan iyo kulun dhinaca Zoom ah oo aad ka dhageysan karo xubnaha Isbahaysiga Hoggaanka Koonfur-bari iyo Kooxda La-taliyaasha Degmada. Waxa aan idinla wadaagi doonaan xog ku saabsan kulanka todobaadka soo socda. Linkyada kulanka bogga shabakada iyo kulanka Zoom-ka waxa la soo diri doonaa ka hor inta aan munaasabada la qaban.

Dhammaan xubnaha bulshada waxa lagu soo dhaweynaya inay ka soo qeybgalaan kulankaasi. Waxa aanu si gaar ah ku boorineynaa qoysaskayaga degan jihada Koonfur-bari ee Portland inay na siyyaan warcelin taasi oo ka taageeri doonto PPS sidii ay habkii ugu

wanaagsanaa u isticmaali lahaayeen dhismahaasi. Ra'yi-celintiinu waxa ay naga caawin doontaa aragtiyada kala gedisan ee ardayda iyo tallo-soo-jeedinta kama dambeysta ah ee qoysaskeena.

**Macluumaad Badan oo Ku Saabsan Isbahaysiga Hoggaanka iyo Habka EPB**

Isbahaysiga Hoggaanka waxa ay ka kooban yihiin ardayda, waalidiinta iyo wakiilo matalaya maamulayaasha iskuulada ku yaala Koonfur-bari (fiiri [Liistada xubnaha](#)). Isbahaysigu waqtigani waxa ay qabanayaan shirar isku xiga oo diirada lagu saarayo fasalada dugsiyada dhexe, oo ay ka mid yihiin kulanka dhacaya bisha Noofembar 12keeda iyo kulanka kooxaha kala gedisan ee todobaadkaasi.

Habkani waxa noqonayaa labo waji: Wajiga koowaad (1) waxaa la soo dhammeystiri tallo-soo-jeedinta bisha Diisember dhexdeeda. Wajiga labaad (2), waxa la diiwaangaliyey in la bilaabo gu'ga sanadka 2021, taasi oo diirada lagu saari doono fasalada PK-5.

Barnaamijka Dheelitirka iyo Diiwaangalintu waxa ay isticmaalayaan nooc xog ah oo la falaqeeyey iyo aragtiyaha bulshadu ay ka hadleen ee baahiyahooda sida sinaanta iyo in laga wada muuqdo, gaadiidka, xaddeyn ta dhismayaasha, iyo in badan oo kale. Ajandaha shirka, qalabka, hadal qoraalka, iyo fiidiyaasha waxaa laga heli doonaa [Shabakada Barnaamijka Dheelitirka iyo Diiwaangalinta](#).